




## DIB U SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA

Isku dayida in la helo dadka ka dibna lala xiriiro qaraabooda waxay ICRC, Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS), shabakadda Jimciyad-Qarameedyada Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas, mutadawiciinta gobolka iyo dunida oo dhan ku tahay dhib weyn.

### DIB-U-DHISIDA XIRIIRKA QOYSKA



Codsiyo dokumentiyo baafin ah oo qabtay xafiska Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed Kismaayo

Muuqaalo sawiro waaweyn ayaa la suray xarumaha muhaajiriinta. Hadda habkan waxaa ku jira facebook-ga.

Adeega ku xiran kombiyuutarka wuxuu sulinaaya xadeynta juquraaji oo muhaajiriintu ay u badantahay in ay la kulmaan marka ay raadinaayaan in ay dib-u- dhisaan xiriirka qoysaskooda. Sannooyinkii la soo dhaafay Soomaaliya waxaa si fiican ugu shaqeeyey barnaamijka maalinlaha ah ee raadiyaha oo magacyada dadka maqan ku baahiya BBC-da Laanta af Soomaaliga.

ICRC-da oo si dhow ula shaqeysa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay tan iyo sanadkii 1991dii bixineysa adeegyada baafinta. Sannadkii la soo dhaafay, xilligii colaada Yaman meeshii ugu sareysay mareysay adeega waxaa loo fidiyey kuwa ka soo cararay colaada.

Intii u dhaxeysay bilaha Janaayo iyo Maarso ee sanadkan, waxaa la isweydaarsaday in ka badan 3,000 farriimaha Laanqeyrta Cas iyo 91 qof ayaa si guul leh loo helay. Intii Isla muddadaas waxaa la helay in ka badan 150 codsiyo baafin ah iyo ku dhowaad 1,300 magacyo dad maqan ah ayaa lagu daabacay website-ka Xiriirka Qoyska ee ICRC.

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo [www.blogs.icrc.org/somalia/so](http://www.blogs.icrc.org/somalia/so)

Email: [sok\\_somaliblog\\_services@icrc.org](mailto:sok_somaliblog_services@icrc.org)

Axaddii oo ah 15-ka Maajo waa xuska Maalinta Caalamiga ah ee Qoysaska. Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrta Cas (ICRC) waxay la shaqeysaa la hawlgaleyaasha Dhaqdhaqaaqa Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas si ay u helaan dadka maqan oo ka lumay colaada, musilbooyinka ama haajirida iyagoo dib loola xiriirnaayo qaraabooda. Tani waxay ku jirtaa in qoysaska loo xaqiijiyo qaddarka ku dhacay kuwa ay jecelyihiin oo maqan.

Barnaamijka Dib-u-soo celinta Xiriirka Qoyska wuxuu soo kobcayey sannooyinkii la soo dhaafay laga soo bilaabo isweydaari farriimo fudud oo ah Farriimaha Laanqeyrta Cas oo u dhaxeysa qoysaska ayaa lagu kordhiyey wicitaano telefoon iyo in badan dhowaanahan waxaa la adeegsadaa hab ku xiran kombiyuutarka.

Iyadoo ay saaciday teknoolojiyada, adeegan muhimka ah wuxuu daboolaya dalabaadka ka imaanaya duni la rafaneyso dhibaatooyinka haajirida oo aan horey u dhicin.



'Trace the face' waa aalad ku xiran kombiyuutarka oo ay abuureen dhowr Jimiyad Qarameedyo reer Yurub ah si loogu caawiyo muhaajiriinta in ay helaan xubnahooda qoyskooda ee maqan. Qofkii raadinaaya qof la jecelyahay waxay sawirkooda dhigi karaan website-ka.